**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**

Talo bixin kooban oo ku saabsan hannaanka loo marayo xulashada Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha, Agaasinka Bii'ada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaaraha iyo Xog-hayaha Joogtada ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga iyo shuruudaha kamid noqoshada Agaasimeyaasha Guud ee Dowladdda Federaalka Soomaaliya

***U-qalmid, Daah-furnaan iyo Habraac Cad***

**Qaabka loo maareynayo xulashada Agaasimayaasha Guud**

## 1. Hordhac

Marka laga reebo magacaabista Golaha Wasiirrada, waxaa kaloo muhiimad baaxad weyn leh, xulashada Agaasimayaasha Guud (DGs), oo ah go'aan saameyn weyn ku leh hor-u-socodka howlaha iyo hoggaanka sare ee Dowladda Federaalka, sababtoo ah, Agaasimayaasha Guud waa kuwa ugu sareeya shaqaalaha Wasaaradaha, mas'uulna ka ah howl-maalmeedka iyo habsami-u-socodka howlaha Wasaaradaha. Waxaa ay udub dhexaad u yihiin hirgelinta hannaan maamul iyo dowlad wanaag. Sidoo kale, waxaa ay mas'uul ka yihiin hirgalinta iyo fulinta qorshaha Wasaaradaha, si loo gaaro natiijada iyo hadafka Wasaarad walba u deggan.

Iyadoo laga duulayo baaqii madaxda dalka ee ahaa tayeynta hey'adaha dowladda, habsami u socodka maamulka dowladeed iyo dardar-gelinta howlaha Wasaaradaha loo igmaday, ayaa Ra'iisul Wasaaraha JFS uu 14kii Oktoobar xeer ku amray in uu bilaabmay u tartamidda Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha, Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Arrimaha Dibada & Iskaashiga Caalamiga  iyo Agaasinka Bii'ada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaaraha.

Hadaba, si loo hirgeliyo isbaddal dhaxal gal ah oo daah furan, fursadna loo siiyo dadka Soomaaliyeed, waxaa hannaanka lagu tartamayo hogaamin doona Guddiga Fulinta ee uu gudoomiye ka yahay Ra'iisul Wasaare ku Xigeenka JFS oo ay kaabayaan Guddi Farsamo, si loogu helo Wasaarad walba Agaasime Guud oo karti, khibrad iyo aqoonba u leh howlaha loo igmaday.

Dhamaan Wasaaraduhu waxay yeelan doonaan Agaasimeyaal Guud marka laga reebo Wasaaradda Arrimaha Dibadda oo yeelenaysa  Xoghaye Joogta ah baahi gaar ah awgeed.

## 2. Dhabbaha loo marayo

b. Wejiga koowaad waxaa lagu xaddidayaa 26-ka Wasaaradood iyo Agaasinka Bii'ada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaaraha oo aanay ku jirin hay'adaha kale ee dowladda. Soo bandhigada shaqaaleynta Agaasimayaasha Guud waxaa loo sameynayaa si wada-jir ah dhammantood iyadoo xulashadooda la kala hormarin doona.
t. Xoghayayaasha Joogtada ah iyo Agaasimayaasha  Guud ee hadda jira way u tartami karaan jagooyinkaas.

## 3. Hannaanka xulista

Hannaanka xulista shaqaalaysiinta wuxuu noqon doonaa mid ku salaysan:

b) Aqoon
t) Waaya-aragnimo
j) Xirfad
X) Karti iyo hufnaan

## 4. Nidaamka shaqaaleynta iyo sida lagu soo xulayo

Guddi Fulineed oo ka kooban xubnaha Golaha Wasiirada (Executive Committee) iyo xubno kamid ah Bulshada Rayidka oo goob-joogayaal ka noqon doona hannaanka xulista ayaa hagaya habraaca shaqaalaysiinta.

Waxaa kale oo jira Guddi Hoosaad Farsamo oo ka kooban xubno laga soo kala xulay hay'adaha dowladda oo arrimaha farsamo ka kaabi doona Guddiga Fulinta.

## 5. Habraaca Tartanka

### i. Heerka kowaad: Soo gudbinta codsiga shaqo

- Tartama walba waxaa kaliya oo loo ogolyahay in uu soo codsan karo ugu badnaan sadex (3) hay'adood
- Qabashada araajida waxey bilaabmeysaa 3da December 2017
- Qabashada codsiga waxey ku egtahay 17ka December 2017 saqda dhexe
- Codsiga shaqo iyo waraaqaha aqoonsiga waxaa lagu soo gudbinayaa: hr@opm.gov.so

### ii. Heerka Labaad: Qiimeynta iyo kala soocidda Codsiyada Tartamayaasha

Waxaa bilaabanaya qiimeynta iyo kala soocidda tartamayaasha si loo soo saaro tartamayaasha u gudbayo qiimeynta sedexaad.

### iii. Heerka Sedexaad: ImtixaankaTartamayaasha

Taratamayaasha u soo gudba heerkaan waxay maridoonan imtixaan isugu jira qoraal iyo wareysi oo ay kor joogtayn doonaan xeeldheerayaal ka madax bannaan Guddiga Fullinta si loo soo xulo liiska ugu denbeeyo ee 27ka jago kaa soo loo gudbin doono Golaha Wasiirada.

### iv. Magacaabista Agaasimeyaasha Guud iyo Xoghayaha Joogtada

Markii ay Golaha Wasiirada ansixiyaan 27ka ku guuleystay qiimeynta, waxaa magacyadooda loo gudbinayaa Ra'iisul Wasaaraha, si uu u magacaabo Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha iyo Xoghayaha Joogtada una gudbinaya Madaxweynaha JFS si uu ugu soo saaro xeer.

Agaasimeyaasha Guud ee Wasaaradaha iyo Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee la magacaabay waxey geli-doonaan sedex bilood oo tijaabo ah.

## 6. Xuquuqda Mushaarka

Agaasimyaasha Guud iyo Xoghayaha Joogtada waxaa ay kimid noqonayaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waxaana mushaaraadkooda bixin doona Dowladda Federaalka.

**Shuruudaha Agaasimaha Guud iyo Xoghayaha Joogtada ee Dowladda Federaalka Soomaaliya**

1. **Qeexid**

Agaasimaha Guud waa sargaalka ugu sareeya maamulka Waasaaradda, waana isku xiraha madaxda siyaasadda iyo howl-wadeenada maamulka Wasaaradda, si loo hir-geliyo qorshayaasha dowladda ay dooneyso in la qabto.

2. **Ujeeddooyinka shaqada**

Mas'uuliyadda Agaasimaha Guud waa hogaaminta Maamulka iyo Maareynta Wasaaradda, waana maamulaha howl-gallada maalinlaha ah, marka laga yimaado Wasiirka, waa qofka ugu sarreeya oo mas'uulka ka ah habsami u socodka howlahha Wasaaradda, taas oo sal u ah dhammaan shuruudaha dowladnimo ee loo baahan yahay.

3. **Baaxadda shaqada**

Shaqada ugu muhiimsan ee Agaasimaha Guud waa maamulka iyo maareynta shaqaalaha, qorsheynta howlaha iyo fulinta qorshooyinka iyo istraatijiyadaha Wasaaradda si waafaqsan sharciga iyo awoodda Wasaaradda.

4. **Waajibaadka Shaqada**

***I. Qorsheynta Istaratijiyadda***

- Dejinta istaratiijiyadaha iyo nidaamka Wasaaradda;
- Dejinta qorshooyinka Wasaaradda ee muddada gaaban iyo midda dheer;
- Hubinta qaab dhismeedka Wasaaradda, iyo sidii loogu guuleysan lahaa loona gaari lahaa hadafka Wasaaradda.

**II. Qorsheynta howlaha**

- Dejinta qorshe si wanaagsan u shaqeynaya iyo hogaamin wadareed
- Soo-jeedinta iyo hirgelinta siyaasadda Wasaaradda, mashaariicda iyo howlaha u baahan in ahmiyad gaar ah la siiyo;
- Ilaalinta, dabagalka iyo ku dhaqanka heshiisyada khuseeya mashaariicda;
- Sameynta iyo hagida qorshaha shaqada, shaqaalaha, mashaariicda iyo hirgelinta hiigsiga Wasaaradda;
- Hubinta iyo kormeeridda qorshaha Wasaaradda iyo warbixinta wax-qabadka Wasaaradda iyo guud ahaan dowladda;
- Diyaarinta warbixin sanadeedka iyo warbixinnada kale;

**III. Maamulka iyo Maareynta**

- Talo-siinta wasiirka/ku-xigeenka si loo gaaro go'aamo cad oo ku dhisan xog iyo cadeymo waafi ah;
- Ilaalinta shuruucda shaqaalaha, hantida iyo maaliyadda iyo la socodka howlaha waxqabad ee Wasaarradda;
- Kormeerka shaqada iyo shaqaalaha;

- Xalinta xaaladaha taagan ee la xiriira howlaha Wasaaradda;
- Hoggaaminta habsami u socodka howlaha Wasaaradda, fududeynta jawi shaqo iyo dhiiri-gelinta shaqaalaha;
- Sameynta shir-gudoonka iyo gudoominta shirarka agaasimeyaasha waaxaha Wasaaradda iyo shir gudoominta golayaasha lagu fuliyo/hago mashaariicda ay Wasaaraddu hogaamiso ama qayb ka tahay;
- Isticmaalka agabka iyo miisaaniyada Wasaaradda si ku dhisan tashiil, waxqabad iyo saameyn munaasab ah;
- Abuurista dhaqan shaqo iyo waxqabad dhiirigaliya daah-furnaan, kor-u-qaadis xirfad, waxtar iyo hogaan hufan;
- Shaqaalaysiinta iyo xaqiijinta dad ku haboon shaqooyinka, si loo gaaro hadafka iyo hiigsiga Wasaaradda;

## IV. Shakhsiyadda qofka iyo waxbarashadiisa

Waa in uu;

- Haystaa shahaadada darajada kowaad ee jaamacad la aqoonsan yahay
- Leeyahay waaya aragnimo shaqo, ugu yaraan 5 sanadood
- Ugu yaraan shan sano oo khibrad ah oo la xiriirta maamulka iyo maareynta
- in uu lee yahay xirfad hadalka iyo qoraalka oo heer sare ah, keeni kartana natiijo afka Soomaaliga
- Leeyahay shakhsiyad iyo dabeecad wanaagsan, lana dhaqmi karo bulshada
- Leeyahay khibrad hogaamineed
- Si wanaagsan ula socdaa waaqaca siyaasadeed iyo tan arrimaha bulshada ee Soomaaliya
- Leeyahay karti shaqo, una adkeysan karo cadaadis xagga shaqada ah